



Euroopan unionin
osarahoittama

Furriinka Finland – habraaca si kooban

Avioero Suomessa - prosessi lyhyesti





Furriinka Finland – habraaca si kooban.



- Furriinka kali ama si wadajir ah ayaa loo codsan kartaa. Furriinku wuxuu ka kooban yahay laba marxaladood.
- Codsiga furriinka waxaa lagu diraa Suomi.fi iyadoo loo dirayo maxkamadda degmada ee aad ku nooshahay AMA boosto ahaan loogu diraa maxkamadda degmada ee aad ku nooshahay.
- Kadibna waxaa jira muddada ka-fiirsashada ee lix bilood ah.
- Kadibna waxaa jira marxaladda labaad. Codsiga furriinka ayaa mar kale la sameeyaa. Waxaa lagu calaamadeeyaa in uu yahay codsiga marxaladda labaad.
- Maxkamadda degmada ayaa xukunta furriinka.



Euroopan unionin
osaraioittama



Tampereen
ammattikorkeakoulu



TAMPERE

**Pirkanmaan
hyvinvointialue**



Xiriirka lammaanaha waa caalami, marka lammaanuhu ka kala yimaadaan dalal kala duwan. Markaas arrimaha qoyska waxaa ku lug yeelan kara shuruucda dal kale. Haddii aad rabto hubanti, waa wanaagsan tahay inaad la hadasho qareen. Qareenka ayaa kugu caawin kara arrimaha qoyska ee caalamiga ah.

Fiiro gaar ah.

Haddii aad haysato ogolaansho deggenaansho ku-meel-gaar ah oo ku saleysan xiriir qoys, u sheeg furriinka isla markiiba hay'adda socdaalka. Mararka qaarkood furriinku wuxuu saameyn karaa ogolaanshaha deggenaanshaha.

Marka waalidku kala tagaan, waxay ku heshiin karaan arrimaha ilmaha iyagoo la kulmaya kormeeraha carruurta. Halkaas waxaa lagu heshiinayaa:

- yaa daryeela ilmaha
- halka ilmuhu ku noolaanayo
- goorta ilmuhu la kulmayo waalidka
- yaa bixinaya lacagta ilmaha

Kormeeraha carruurta wuxuu sidoo kale talo ka bixiyaa arrimo kale oo la xiriira kala tagga. Adeegga kormeeraha carruurta waa bilaash.



**Pirkanmaan
hyvinvointialue**





Euroopan unionin
osarahoittama

Niitty 2 -hanke 2023-2026

Yhdessä maahanmuuttajaperheiden
hyvän arjen puolesta

Lisätietoa hankkeesta:
<https://projects.tuni.fi/niitty2/>

Perheinfo-aineistoportaali:
tuni.fi/perheinfo



**Pirkanmaan
hyvinvointialue**



TAMPERE